

**Barnaamij u sameynta qaababka loola dhaqmo canuga qaba xanuunka la yiraahdo (Autism/P.D.D). Waa xanuun maskaxeed oo gofka qabo uu kaligii isku mashquulsan yahay uuna cidna la xiriireyn, lana dhaqmevn.**

**La Dhaqanka canuga qaba xanuunkaasi:**

1. Fariiso meel ku aadan indhaha canuga.
2. Taabo gacanta canuga marmar si aad usoo jeediso dareenkiisa.
3. Dheh magaca canuga marmar, inta aad hawsha u wadid.
4. Isticmaal ama dheh hadallo 2-3 erey ka kooban adigoo culeys saaraya dhacdooyin iyo ereyo muhiim ah. Sida: “Ahmed, riix ama laad kubadda.”
5. Ka faaloo ama wax ka dheh waxyaabaha uu canuga ama caruurta agagaarkiisa aay sameynayaan.
6. Ahow qof furfuran oo xoojinaya waxyaabaha uu canuga uu ku fiican yahay adigoo ku amaanaya waxyaabaha uu qabtay ama ay qabatay.  
Sida: Gevon halxiraalihii wuu sameeyey ama wuu furay.
7. Xooji ama qiimee hadalka canuga adigoo soo celcelinaya waxa uu dhaho/dhahdo, kadib balbalaari.  
Sida: Canuga: “baabu soconaayo.”  
Qofka weyn: “baabuur soconaaya.”  
Qofka weyn: “baabuurkii casaa wuu soconayaa.”
8. Marka canugaaga uu kaa daba dhahayo waxa aad markasta tiraahdo sida shimbirta daaguusta la dhaho, markaa canuga waxuu qabaa xanuun la dhaho (Echolalia).  
Sida: Qofka weyn: “ma juus kale baad rabtaa.”  
Canuga: “ma juus kale baad rabtaa.”
  - a) Markasta waxaad isticmaashaa hadalo fudud oo soo celcelintooda aay haboontahay.  
Sida: Qofka weyn: “juus maad rabtaa”  
Canuga: “juus baan rabaa”
  - b) Waxba ha ka soo qaadin kadaba dhihid daahday.
9. Weynee dareenka aad ku muugineysid wejigaaga (indhahoo aad u furtid, ciribaha oo aad kor u jiidid.)
10. Isticmaal ama muuji dareenka jirka (farfiqidida iyo gacan dhaqaajita.)
11. Isticmaal waxyaabaha iyo sawirada markaa la heli karo.
12. **Raaxeyso.**